

### 3.4

#### Wasaarada Adeega Adamigu ma caawin kartaa?

**Wasaarada Adeega Adamiga** ayaa ah meesha laga bilaabo xalal badan oo iinta. Waxaa laga yaabaa inay awoodaan inay kaa caawimaan waxyaallaha ay ka midka yihiin:

- Macluumaad, talo iyo caawimo
- U xawilida kaalmada bulshada
- Wax ka qabshada qalalaasaha
- Qorshe shakhsiyeed
- Maaraynta kayska muddo- gaaban
- Kharaj ku bixinta barnaamijyada iyo daryeel uu ka mid yahay guri ku kaalmayn
- Qalabka iyo wax ka bedelida guriga
- Deegaan muddo dheer ah

Wixii intaas ka badan la xiriir **Kooxda Intake and Response ee Wasaarada Adeega Adamiga** 1800 783 783.

**Yaan la xiriiri karaa?**

<http://www.cmag.org.au>

### U qorshaynta mustaqbilka?

#### Waa maxay Disability Support Register (DSR)?

Disability Support Register (DSR) waa dariiqo lagu diiwaangeliyo qofka baahidiisa hadda ah iyo kaalmada joogtada ah. Diiwaangelintu waxay kaloo caawintaa qorshaynta mustaqbilka ee baahida dadka iinta leh.

Waxaad la xiriiri kartaa bixiyaha adeega iinta ama kooxda Intake and Response ee Wasaarada Adeega Adamiga waxayna kaa caawimi karaan inaad hesho kaalmada iinta.

Wac **Intake and Response** ee Wasaarada Adeega Adamiga 1800 783 783 una sheeg baahidaada.

#### Ma u baahan tahay talo sharci ah?

**Villamanta Legal Service** waxay ku takhasustay caawinta dadka iinta leh, khaasatan kuwa garaadka wax ka qaba sida dhaxalka.

Waxay siisaa caawimo Dawlad Goboleedka oo dhan ah (in kastoo ay ku salaysan tahay Geelong) iinta la xiriirta arrimaha sharciga waxaana lagala xiriiri karaa 5229 2925.

#### Ma jiraa daryeelle laga yaabo in aanu doorkiisa sii wadi karin?

Haddii uu jiro daryeelle qoyskaaga ka tirsan kaas oo soo gaboobaya ama laga yaabo in aanu sii wadi karin doorkiisa daryeelle waxaa jira macluumaad lagu caawimo qorshaynta mustaqbilka.

**Office of the Public Advocate**, oo uu la jiro **Victoria Legal Aid** ayaa sameeyey tuse si sahala loo raaci karo “Xajiinta mustaqbilkaaga”, oo daboolaya arrimaha lagu xaqiijinayo mustaqbilka xubnaha iinta qaba.

Haddii aad u baahan tahay macluumaad ku saabsan awooda qareenka, masuulka, dhaxalka iyo qorshaynta guryaha midaani waa bar fiican oo macluumaad.



**Victoria Legal Aid** waxaa lagala xiriiri karaa 9269 0120 si loo codsado nuqul lacag la'aana “**Securing Their Future**”

Ama booqo [www.legalaid.vic.gov.au](http://www.legalaid.vic.gov.au)

Xafiiska **Office of the Public Advocate** wuxuu ilaaliyaa danta, xuquuqda iyo sharafta dhamaan dadka reer Fiktooriya ee iinta leh. Waxay bixiyaan talo iyo macluumaad ku saabsan mawduucyada ay ka midka yihiin masuuliyada, raali noqoshada daawada, u hadlida iyo maamulka dhaqaalaha. Waxana laga xiriiri karaa 1300 309 337 ama TTY 9603 9529.